# Sanduuqa Agabka Isgaarsiinta LEA:

## Marka la eego Xaaladaha Gurmadka ah & Dhacdooyinka Muhiimka ah

Qalabkani wuxuu bixiyaa tambaleytyo isgaarsiineed oo diyaar u ah in LEA ay u isticmaali karto inay si degdeg ah ugu wargeliso bulshooyinkooda dugsiga inta lagu jiro xaaladaha degdegga ah iyo dhacdooyinka kale ee muhiimka ah. Tambaleytyadani waxay taageeraan farriimo cad, joogto ah, oo waqti ahaan habboon in loo diro dhammaan daneeyayaasha, iyagoo gacan ka geysanaya dhisidda kalsoonida, xaqiijinaya daahfurnaanta, oo ku ilaalinaya qof walba xogogaal marka ay ugu muhiimsan tahay.

**Qormadani waxaan kaga hadli doonnaa hababka isgaarsiinta ee soo socda:**

- Limeyl
- Farriin gaaban
- Farriinta Codka




Wixii macluumaad dheeraad ah booqo: [www.schools.utah.gov/schoolsafetyandstudentservices](http://www.schools.utah.gov/schoolsafetyandstudentservices)

# Qaybaha


Hakad | Guud ..... 4

Hold (Hakin)| Dagaal ..... 5

'Secure (Amaan)' | Guud ..... 6

Lockdown (Xayiraad) | Guud ..... 8

Booliska oo Dugsiga Agtiisa Heegan kaga Jira ..... 10

Toogte Firfircoon ..... 12

'Evacuate (Ka Bax)' | Guud ..... 16

Khatarta Miino ..... 18

Digniinta Dabka oo la Taabtay | Dab Ma Jirin ..... 20

Dabka ..... 21

Gabbaad ..... 23

Halis | Gaas ..... 25

Xaalada Walxaha Khatarta ah (HAZMAT) ..... 26

Tagitaanka Korontada ama Internetka ..... 27

Jebitaanka Qasabad Wayn ..... 29

Khatarta Beenta ah | Warbaahinta Bulshada ..... 30

Guud ..... 32

Hub | Marka Baska ..... 33

Hub | Gudaha Dugsiga ..... 34

Caafimaad | Gurmad ........................................................................................................ 35

Ardayda Sakhraansan ..................................................................................................... 36

Dhimasho ........................................................................................................................ 37

Ammaanka Ardayda ........................................................................................................ 42

Arday Isku Dayay Afduub ............................................................................................... 43

Arday La Waayey ............................................................................................................ 44

Wax kale .......................................................................................................................... 45

Fasax Maamul ee Macallinka | Ku-meel-gaar ................................................................. 47

Fasax Maamul ee Macallinka | Abadi .............................................................................. 48

Khayraadka ..................................................................................................................... 51

## Hakad | Guud

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 121*)

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Farriinta waxaan idiinku soo qoraynaa inaan idiin sheegno xaalad ka dhacday xarunta [saaka/gallinkan dambe].

Qiyaastii markay ahayd [waqtiga] waa la noo sheegay [sharrax xaaladda]. Waxaanu u qaadannaa xaaladaha sidan oo kale ah si dhab ah oo isla markiiba waxaanu fulinay xaalad 'Hold (Hakin)' si aan ugu ilaalino ammaan ardaydeena iyo shaqaalaheena fasalada ilaa walwal kasta oo ku saabsan [xaaladda] uu meesha ka baxo.

Waxbarashadu waxay sii socotay inta lagu gudajiray xaaladda "hold (hakin)". Qiyaastii markay ahayd [waqtiga] waxaanu sheegnay inay dhibtii dhammaatay, oo xarunta wuxuu dib u bilaabay jadwalkiisii caadiga ahaa.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka 'Hold (Hakin)', fadlan booqo dib-u-eeg buugyaraha "I Love U Guys" Foundation. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Waad ku mahasan tihiin taageeradiina sii socota [magaca dugsiga]. Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

# Hold (Hakin)| Dagaal

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 155*)

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa warbixin ku saabsan xaalad ka dhacday xarunta [saaka/gallinkan dambe].

Waxaan gelinay dhismaha xaaladda 'Hold (Hakin)' si aan ardayda iyo shaqaalaha uga ilaalinno inay ku wareegaan dhismaha halka [maamulayaasha/booliska] ay maaraynayeen dagaal [ ka dhacay fasal/marinka/meel kale]. Jawaabteena waxay ahayd mid degdeg ah, ardaydu waxay ahaayeen kuwo ammaan ah oo sii wadaya waxbarashada ilaa dhacdada la xalliyo.

Amaanka iyo amniga ardayda iyo shaqaalaaleena waa mudnaanta ugu sarraysa ee [LEA ama dugsiga], waxaana mar walba qaadan doonnaa tallaabo kasta si loo xaqiijiyo ammaankooda. Fadlan ka faa'iideyso fursadda si aad uxusuusiso ilmahaaga in khatar kasta oo dhici karta ay tahay in la soo sheego [iyada oo loo marayo SafeUT ama habab kale]. Iyada oo la kaashanayo qof walba, waxaan sii wadi karnaa inaan sii wadno dugsigeena inay ahaadaan meel ammaan ah oo aan wax ku baran karno.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka 'Hold (Hakin)', fadlan booqo buugyarahan "I Love U Guys" Foundation. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, igala soo xiriir [iimeylka] ama [lambarka taleefanka]. Waxaan u mahadcelinayaa iskaashigaaga waxbarashada ardaygaaga.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

# 'Secure (Amaan)' | Guud

## Xilliga Dhacdada

**Tambaleytka Qoraalka (*Tirada erayada: 38*)**

[Magaca Dugsiga] wuxuu hadda ku jiraa 'Secure (Amaan)' 'sababtoo ah [sharrax xaaladda]. Qof walba waa ammaan, dhammaan ardayda iyo shaqaalaha ayaa la keenay gudaha dhismaha oo albaabada bannaanka waa la xiray. Waanu kula socodsiin doonnaa marka aan helno macluumaad dheeraad ah.

---

**Tambaleytka Iimeylka (*Tirada erayada: 100*)**

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaan idiinku soo dirayaa farriintan inaan idiin sheego in dugsigeena uu hadda ku jiro xaalad "Secure (Amaan)" ah. Qof walba waa ammaan, laakiin waxaan keennay dhammaan ardayda iyo shaqaalaha gudaha dhismaha oo albaabada bannaanka waa la xiray.

Waxaan fulinay xaaladda 'Secure (Amaanka)' sababtoo ah qiyaastii markay ahayd [waqti] waxaa naloo sheegay in [sharrax xaaladda]. Waxaanu u qaadannaa xaaladaha sidan oo kale ah si dhab ah oo aan qaadnaa talaabooyinka ku habboon iyadoo la raacayo borotokoolka amniga iyo ammaanka degmada si aan u ilaalino ardaydeena iyo shaqaalaheena.

Jadwalkeena fasalka ee caadi ah ayaa weli socda xilligan. Waxaanu idinla socodsiin doonnaa marka aan awoodno inaan soo saarno in dhibtii dhammaatay.

---

Farta Farriinta Codka (Tirada erayada: 40)

Qoyska [Magaca dugsiga], waxaan hadda ku jirnaa 'Secure (Amaan)' sababtoo ah [sharrax xaaladda]. Qof walba waa ammaan, dhammaan ardayda iyo shaqaalaha ayaa la keenay gudaha dhismaha oo albaabada bannaanka waa la xiray. Waanu kula socodsiin doonnaa marka aan helno macluumaad dheeraad ah.

## Kadib Dhacdada

**Tambaleytka Iimeylka (*Tirada erayada: 115*)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaanu farriintan kuugu soo dirayaa inaan kuu sheego xaalad ka dhacday xarunta [saaka/gallinkan dambe] taas oo nagu qasabtay inaan dhismaha gelino xaalad ‘Secure (Amaan’) ah.

Qiyaastii markay ahayd [waqtiga] waa la noo sheegay [sharrax xaaladda]. Waxaanu qaadannaa xaaladaha sidan oo kale ah si dhab ah waxaanan isla markiiba qaadnay tallaabooyin lagu ilaalinayo ammaanka ardayda iyo shaqaalaha. Xaaladda ‘Secure (Amaan)’, qof walba waxaa la soo geliyey gudaha dhismaha, albaabada bannaanka ayaa la xiray oo jadwalka xarunta ayaa u sii socday sidii caadiga ahayd ilaa inta in dhibtii dhammaatay laga sheegayey.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka ‘Secure (Amaanka)', fadlan booqo buugyaraha "I Love U Guys" Foundation. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

# Lockdown (Xayiraad) | Guud

## Xilliga Dhacdada

**Tambaleytka Qoraalka** (*Tirada erayada: 25*)

Fadlan ogow in [Magaca dugsiga] uu hadda ku jiro xaaladda 'Lockdown (Xayiraad)' iyadoo sababtu tahay [sharrax xaaladda]. Ardayda iyo shaqaaluhu waa ammaan. Waxaanu kula socodsiin doonnaa marka 'Lockdown (Xayiraadda)' la qaado.

---

**Tambaleytka Iimeylka** (*Tirada erayada: 42*)

Qoyska [Magaca dugsiga],

Fadlan ogow in [Magaca dugsiga] uu hadda ku jiro 'Lockdown (Xayiraad)'. Qof kastaa waa ammaan gudaha dhismaha, albaabada bannaanka waa la xiray, haddana qofna looma oggola gudaha inuu soo galo. Waxaanu kula socodsiin doonnaa marka 'Lockdown (Xayiraadda)' la qaado.

---

**Farta Farriinta Codka** (*Tirada Erayada: 43*)

Qoyska [Magaca dugsiga], xarunteenu hadda waxay ku jirtaa 'Lockdown (Xayiraad') sababtoo ah [sharrax xaaladda]. Qof kastaa waa ammaan qabaa gudaha dhismaha. Albaabada waa la xiray, hadda qofna looma oggola inuu gudaha soo galo. Waxaanu kula socodsiin doonnaa marka 'Lockdown (Xayiraadda)' la qaado.

## Kadib Dhacdada

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 149***)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaa naga go'an inaan siino jawi waxbarasho oo ammaan ah oo loogu talagalay ardaydeena iyo inaan qoysaskeena ku wargelino waxa ka dhacaya xarunteeda.

Maanta, waxaanu ka fulinay 'Lockdown (Xayiraad)' qiyaastii [waqtiga maalinta] si aan u sugno ammaanka ardaydeena iyo shaqaalaheena inta lagu jiro [xaalad suurtogal ah oo halis ah (sharrax)/caado (sharrax daawo ama raadinta kale)].

'Lockdown (Xayiraaddu)' waxa ay jirtay ilaa qiyaastii (waqtiga) intii [aan wadnay raadinteena/booliska noo sheegay in dhibtii dhammaatay] waxaana la qaaday [waqtiga].

Kadib, waxbarashada waa sii socotay waxaana ardayda iyo macalimiinta sii wadeen jadwalka fasalka ee caadiga ah. Shaqaaluhu waxay xaaladda u maareeyeen qaab xirfad sare leh sababtoo ah tababarka joogtada ah ee ay heleen ee ku saabsan borotokoolka ammaanka iyo amniga.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka 'lockdown (xayiraadda)', fadlan booqo buugyaraha "I Love U Guys" Foundation. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

# Booliska oo Dugsiga Agtiisa Heegan kaga Jira

## Xilliga Dhacdada

**Tambaleytka Qoraalka (***Tirada erayada: 30***)**

[Magaca dugsiga] hadda waxa uu ku jiraa xaaladda 'Secure (Amaan)' ah sababtoo ah dhaqdhaqaaqa booliska ee u dhow xarunteeda dartii. Qof kastaa waa ammaan qabaa gudaha dhismaha. Waanu kula socodsiin doonnaa marka aan helno warka ah in dhibtii dhammaatay.

---

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 45***)**

[Magaca dugsiga] hadda waxa uu ku jiraa xaaladda 'Secure (Amaan)' ah sababtoo ah dhaqdhaqaaqa booliska ee u dhow xarunteeda dartii. Qof kastaa wuxuu aamin ku yahay gudaha dhismaha, albaabadayada bannaanka waa la xiray, waqtigan, qofna uma oggolaaneyno inuu gudaha galo. Waanu kula socodsiin doonnaa marka aan helno warka ah in dhibtii dhammaatay.

---

**Farta Farriinta Codka (***Tirada Erayada: 45***)**

[Magaca dugsiga] hadda waxa uu ku jiraa xaaladda 'Secure (Amaan)' ah sababtoo ah dhaqdhaqaaqa booliska ee u dhow xarunteeda dartii. Qof kastaa wuxuu aamin ku yahay gudaha dhismaha, albaabadayada bannaanka waa la xiray, waqtigan, qofna uma oggolaaneyno inuu gudaha galo. Waanu kula socodsiin doonnaa marka aan helno warka ah in dhibtii dhammaatay.

## Kadib Dhacdada

**Tambaleytka Iimeylka (*Tirada erayada: 167*)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Dugsigeenu wuxuu mudnaanta koowaad siinayaa xaqiijinta ammaanka ardaydeena iyo shaqaalaheena. Iyada oo la raacayo ballanqaadkayaga xiriirka wax ku oolka ah ee bulshadeena dugsiga, waxaan rabay inaan kuu sheego wixii maanta ka dhacay xarunta.

Marka laga soo tago taxaddar badan, waxaan gelinay xarunteeda qaabka 'Secure (Amaan)' [saaka/ gallinkan dambe] iyadoo laga jawaabayo dhaqdhaqaaqa booliska ee u dhow dugsigeena. Waxaan ku sameynay tan codsiga [sharci fulinta] iyo iyadoo la raacayo tilmaamaha isku diyaarinta xaaladda gurmadka ah ee [LEA].

Fasallada ayaa la sii waday inta lagu guda jiray dhacdada, dhaqdhaqaaqa ayaana dib ugu soo laabtay sidii caadiga ahayd ka dib qiyaastii [dhererka waqtiga] markii boolisku sheegeen inay dhibtii dhammaatay.

Waxaan u mahadcelineynaa xirfadda shaqaalaheena iyo iskaashiga ardaydeena. Qaabka loo maareeyay xaaladda waxay muujineysaa mudnaanta [LEA/Dugsigu] siinayo ammaanka iyo amniga.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka 'Secure (Amaanka)', fadlan booqo buugyaraha "I Love U Guys" Foundation. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

# Toogte Firfircoon

## Xilliga Dhacdada

**Tambaleytka Qoraalka (***Tirada erayada: 48***)**

Waqtigan xaadirka ah, [magaca dugsiga] ayaa xayiran maadaama [magacow wakaaladaha sharci fulinta] ay baarayaan xaaladda cid wadata hub oo ku jirta. Ardayda iyo shaqaaluhu waxay ku xiran yihiin fasalladooda ama xafiisyadooda, mana jiro booqdayaal la oggol yahay inay soo galaan waqtigan.

Waan kula socodsiin doonnaa marka aan ogaano macluumaad dheeraad ah. Mahadsanid.

---

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 51***)**

Qoyska [magaca dugsiga], hadda, kambaskeenu waxay ku jirtaa xayirnaan maadaama [magacow wakaaladaha sharci fulinta] ay baarayaan xaaladda cid wadata hub oo ku jirta. Ardayda iyo shaqaaluhu waxay ku xiran yihiin fasalladooda ama xafiisyadooda, mana jiro booqdayaal la oggol yahay inay soo galaan waqtigan.

Waan kula socodsiin doonnaa marka aan ogaano macluumaad dheeraad ah. Mahadsanid.

---

**Tambaleytka Iimeylka: Dib-u-midaynta - Weli ku jira Xayiraad (***Tir erayada: 65***)**

[Taariikhda]

Qoyska [Magaca dugsiga],

[Magaca dugsiga] ayaa weli ku jira xayiraad, ardayda iyo shaqaalaha ayaa weli ku xiran fasaladooda/ xafiisyadooda halka sharci fulinta ay ku shaqaynayso 'Secure (Amaan)' dhismaha.

Dhanka kale, waxaan xoojineynaa hanaankayaga dib u mideynta si waalidiinta/mas'uuliyiinta ay dib ula midoobi karaan ardaydooda.

Marka aan ka helno warka ah in dhibtii dhammaatay sharci fulinta, waxaanu kuula soo xiriiri doonnaa hannaankaas dib-u-midaynta.

Mahadsanid.

**Tambaleytka Iimeylka: Hanaanka Dib-u-midaynta - Dhibtii Dhammaatay (***Tir ada kalada: 95***)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Sharci fulinta waxay na siisay warka ah in dhibtii dhammaatay oo dhismuhu yahay mid ammaan ah, waxaanan bilawnay qorshayaashayada inaan kula kulmino ardaygaaga.

Waqtigan xaadirka ah, ardayda ayaa si ammaan ah loogu kaxaynayaa [dhanka basaska/socodka]. Fadlan ogow in ardaydu ay heli doonaan cunto iyo biyo gudaha. Sidoo kale si sax ah ayaa loo kormeerayaa.

Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta [magaca dugsiga] waxaa laga codsanayaa inay ardaygooda ka soo qaataan [magaca goobta], oo ku yaal [cinwaanka]. [Fadlan soo diyaarso aqoonsigaaga/ku dar wixii macluumaad ah ee khuseeya habraaca qaadashada.]

Mahadsanid.

---

**Tambaleytka Iimeylka: Faahfaahinta Dhacdada - La-taliyayaal ayaa laga heli karaa Goobta Dib-u-midaynta**
**(***Tirada erayada: 123***)**

[Taariikhda]

Qoyska [Magaca dugsiga],

Ka dib dhacdadii [magaca dugsiga], mudnaanteena koowaad waxay ahayd inaan hubinno ammaanka ardaydeena iyo inaan ka shaqeyno qorshe aan kugula midayno iyaga.

Baadhitaanka wixii maanta ka dhacay dugsigeena wuxuu ku jiraa marxaladihii ugu horreeyay, sidaa darteed faahfaahinta wali waa la xaqiijinayaa, laakiin waxa aanu kuu sheegi karno waa [xaqiiqooyinkaas la baahin karo].

Waxaan fahamsanahay in wixii maanta dhacay ay ahayd dhacdo naxdin ku leh ardaydeena iyo shaqaalaheena. Fadlan ogow [adeegyada la-talinta waxaa laga heli doonaa [magaca goobta dib-u-midaynta] kuwa u baahan daryeel deg-deg ah].

Mar kale, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ardayda [magaca dugsiga] waxaa laga codsanayaa inay ardaygooda ka soo qaataan [magaca goobta iyo cinwaanka].

**Tambaleytka Iimeylka: Dib-u-midaynta - Dib u dhacay/Macluumaadka ku aaddan Walaalaha** (*Tirada erayada: 135*)

[Taariikhda]

Qoyska [magaca dugsiga],

Waxaan kaaga mahadcelineynaa dulqaadkaaga inta aan ka shaqeyneyno inaan si nabad ah kuula midayno ardaygaaga.
Iyada oo qayb ka ah hannaanka amniga, waxaan rabnaa inaan hubinno in dhammaan ardayda la tiriyo oo ay guriga u raacayaan mas'uulka/cidda lagala xiriiro ee ku habboon. Nidaamkan xaqiijinta wuxuu qaadan karaa waqti, waxaanan ka cudur daaraneynaa wixii dib u dhac ah ee aad la kulmi karto.
Fadlan ogow in ardaydu ay ku haystaan cunto iyo biyo gudaha [magaca goobta dib u midaynta]. Sidoo kale si sax ah ayaa loo kormeerayaa.

[Waxaan rabnaa inaad ogaatid in haddii aad haysato ilmo kale oo joogo kambas kale oo u baahan in la qaado marka rawaxaadda, maamulayaasha kambaska la heli doono si ay u kormeeraan ardayda ilaa aad awoodo inaad timaado oo aad qaadato ilmahaaga.]
Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga iyo iskaashigaaga inta lagu jiro hannaankan.

---

**Farta Farriinta Codka** (*Tirada erayada: 51*)

Qoyska [magaca dugsiga], hadda, kambaskeenu waxay ku jirtaa xayirnaan maadaama [magacow wakaaladaha sharci fulinta] ay baarayaan xaaladda cid wadata hub oo ku jirta. Ardayda iyo shaqaaluhu waxay ku xiran yihiin fasalladooda ama xafiisyadooda, mana jiro booqdayaal la oggol yahay inay soo galaan waqtigan. Waan kula socodsiin doonnaa marka aan ogaano macluumaad dheeraad ah. Mahadsanid.

## Kadib Dhacdada

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 202*)

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Bal aan ku bilaabo inaan dhaho in qofna uusan si dhab ah u fileynin inuu arko wax sidan oo kale ah oo ka dhacaya kambaskii. Waxay ahayd maalin adag, waxaanan rabnaa inaan kaaga mahadcelino iskaashigaaga iyo dulqaadkaaga intii aanu "Secure (Gudaha Joognay) kambaskeena oo aan la shaqeynaynay sharci fulinta si aan si nabad ah ugu soo celinno ardaydeena qoysaskooda.

[Waxaan joojineynaa dhammaan howlaha dugsiga ka dib, oo ay ku jiraan dhacdooyinka ciyaaraha iyo geemamka, ee [geli muddada waqtiga].

Waxaa jiri doona adeegyo la-talin oo dadban oo la heli karo oo loogu talagalay ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska si looga caawiyo shakhsiyaadka inay bilaabaan howsha wixii dhacay [geli macluumaadka/khayraadka halkan].

Waxaan sidoo kale bixinaa adeegga Taageerada Ardayga [LEA/Dugsiga] [halkan], kaas oo siiya [caawimaad ardayda]. Sidoo kale, [SafeUT waa wada-sheekaysiga dhibaatada iyo khadka talooyinka ee bixiya faragelinta dhibaatada waqtiga-dhabta ah iyo taageerada qarsoodiga ah ee ardayda, waalidiinta, iyo barayaasha iyada oo loo marayo wada-sheekaysiga tooska ah iyo khadka talooyinka, oo la heli karo 24/7].

Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga iyo fahamkaaga waqtigan adag. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka ‘lockdown (xayiraadda)’, fadlan booqo buugyaraha "I Love U Guys" Foundation.

Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.
Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

# 'Evacuate (Ka Bax)' | Guud

## Xilliga Dhacdada

**Tambaleytka Qoraalka (***Tirada erayada: 35***)**

Qoyska [magaca dugsiga], waxaan yeelanay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' dhismaheena sababo la xiriira warbixinno sheegaya [qiiq/dab, xaalad kale sida la sharraxay].
Qof kastaa waa ammaan, waana ku ogeysiin doonnaa marka la na siiyo warka ah in dhibtii dhammaatay si aan caadigii ugu laabano.

---

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 45***)**
Qoyska [magaca dugsiga], waxaan yeelanay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' dhismaheena sababo la xiriira warbixinno sheegaya [qiiq/dab, xaalad kale sida la sharraxay].

[Magaca waaxda] ayaa si degdeg ah u yimid halkan baaritaan wada. Qof kastaa waa ammaan, waana ku ogeysiin doonnaa marka la na siiyo warka ah in dhibtii dhammaatay si aan caadigii ugu laabano.

---

**Farta Farriinta Codka (***Tirada Erayada: 52***)**

Qoyska [magaca dugsiga], waxaan dooneynay inaan ku ogeysiino inaan ku jirno xaalad 'Evacuate (Ka Bax)' ah dhismaheena sababo la xiriira warbixinnada [qiiq/dab, xaalad kale sida la sharraxay].

[Magaca waaxda] ayaa si degdeg ah u yimid halkan baaritaan wada. Qof kastaa waa ammaan, waana ku ogeysiin doonnaa marka la na siiyo warka ah in dhibtii dhammaatay si aan caadigii ugu laabano.

## Kadib Dhacdada

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 136*)

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca dugsiga] ee qaaliga ah,

Ammaanka ardaydeena waa mudnaanteena koowaad, waana muhiim in aan kula socodsiino waxa ka dhacaya kambaskeena.

Maanta, qiyaastii [waqtiga], waxaan galnay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' kambaskeena sababtoo ah [warbixinno sheegaya qiiq/dab, xaalado kale sida la sharraxay].

Sababtoo ah tani waa wax aan ku tabobarano inta lagu jiro tijaaboyinka sida caadiga ah loo qorsheeyay, ardayda iyo shaqaaluhu waxay ahaayeen qaar xasilloon waxayna u nadiifiyeen dhismaha qaab nidaamsan.

[Waaxda dabdamiska/booliska/maamulka] ayaa baaray oo go'aamiyay [sharrax xaaladda]. Dhammaanteen waxaan ku soo noqonay fasalka qiyaastii [waqtiga] iyo maalintayada [waxay u sii socotay sida caadiga ah/hore u soo baxnay].

Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga joogtada ah ee waxbarashada ardaydeena.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka 'Evacuate (Ka Bax)', fadlan booqo buugyaraha"I Love U Guys" Foundation. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

# Khatarta Miino

## Xilliga Dhacdada

**Tambaleytka Qoraalka (***Tirada erayada: 35***)**

Qoyska [magaca Dugsiga], waxaan gelinay xaalad 'Evacuate (Ka Bax)' ah dhismaha sababo la xiriira khatar miino. Qof kastaa waa ammaan, maamulkuna way baarayaan. Waan kula socodsiin doonnaa marka aan helno warka ah in dhibtii dhammaatay si aan ugu laabano gudaha.

---

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 45***)**

Qoyska [magaca dugsiga], waxaan farriintan kuugu soo qorayaa inaan ku ogeysiino inaan gelinay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' dhismaheena sababo la xiriira khatar miino.
Qof kastaa waa ammaan. [Booliska/maamulada kale] ayaa halkan baaritaan ka samaynaya.
Waxaan dib ugu laaban doonnaa gudaha ka dib markii raadinta la dhammaystiro oo aan helno warka ah in dhibtii dhammaatay.

---

**Farta Farriinta Codka (***Tirada Erayada: 43***)**

Qoyska [magaca dugsiga], waxaad heleysaa farriintan maxaa yeelay waxaan gelinay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' dhismaheena sababo la xiriira khatar miino.
Qof kastaa waa ammaan. [Booliska/maamulada kale] ayaa halkan baaritaan ka samaynaya.
Waxaan dib ugu laaban doonnaa gudaha ka dib markii raadinta la dhammaystiro oo aan helno warka ah in dhibtii dhammaatay.

# Khatarta Miino

## Kadib Dhacdada

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 177*)

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaan kuugu soo qorayaa farriintan inaan ku ogeysiiyo xaalad dhacday [saaka/gallinkan dambe] iyo inaan sharraxno talaabooyinka aan qaadnay si aan u hubinno ammaanka ardaydeena iyo shaqaalaheena.

Qiyaastii [waqtiga] waxaa naloo sheegay in qof uu ku soo weeraray miino dugsiga. Waxaan u qaadannaa xaaladaha sidan oo kale ah si dhab ah isla markiibana [waan baaray/xaqiijiyay] jiritaanka khatarta oo aan u sheegnay [booliska/maamulada].

Iyada oo la isku dayayo in la baabi'iyo khatar kasta oo ku iman karta ardaydeena iyo shaqaalaheenna, waxaan gelinay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' dugsiga ilaa baaritaanka la dhammeeyey oo maamuladuna ay na siiyeen warka ah in dhibtii dhammaatay oo aan ku laabano.

Markaad ilmahaaga kala hadleyso dhacdadan, fadlan ka faa'iideyso fursadda si aad ugu sharaxdo in khatar kasta oo suuragal ah ay tahay in la soo sheego [iyada oo loo marayo SafeUT ama habab kale]. Iyada oo la kaashanayo qof walba, waxaan sii wadi karnaa inaan sii wadno dugsigeena inay ahaadaan meel ammaan ah oo aan wax ku baran karno.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Fadlan tixraac Hagaha Hanjabaadaha Beenta ah si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan aqoonsiga iyo ka jawaabida falcelinta suurtagalka ah ee ardaydaada ee hanjabaadaha. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka 'Evacuate (Ka Bax)', fadlan booqo buugyaraha "I Love U Guys" Foundation. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Waad ku mahasan tihiin taageeradiina sii socota [magaca dugsiga].

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 160***)**

[Taariikhda]

Qoysaska [magaca dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaan fahamsanahay sida ay muhiim u tahay in aan kuula soo xiriirno waxa ka dhacaya xarunteena waana sababta aan kuula soo xiriirayo si aan kuugu sheego macluumaad ku saabsan dhacdo maanta dhacday.

Maanta intii lagu jiray [waqtiga fasalka], digniinta dabka ayaa si aan ula kac ahayn loo taabtay, taas oo kicisay nidaamka digniinta oo si otomaatig ah farriin ugu dirtay waaxda dabka ee xarunteena.

Sida uu dhigayo borotokoolka xaaladda gurmadka ah ee degmada, waxaan gelinay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' xarunta oo aan ku sugeynay bannaanka qiyaastii [waqtiga] ilaa waaxda dabdamiska ay ka hubisay inay ammaan tahay in la gali karo.

Markii aan helnay warka ah in dhibtii dhammaatay, ardaydu waxay ku noqdeen fasalkooda waxayna dib u bilaabeen jadwalkooda joogtada ah.

Nidaamyadeena xaaladda gurmadka ah waxay u shaqeeyeen si habsami leh, oo aad ayaan ugu faraxsanahay ardaydeena iyo shaqaalaheena. Ardaydu dhammaantood waxay raaceen tilmaamaha, shaqaalaheenuna waxay u 'Evacuate (Bixiyeen)' ardayda si degdeg ah oo ammaan ah.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka 'Evacuate (Ka Bax)', fadlan booqo buugyaraha"I Love U Guys" Foundation. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Mansabka]
[Magaca dugsiga]

# Dabka

## Xilliga Dhacdada

**Tambaleytka Qoraalka (***Tirada erayada: 35***)**

Waxaan gelinay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' kambaskeena sababo la xiriira dab yar oo ka kacay [goobta]. Qof kastaa waa ammaan. [Magaca waaxda dabka] ayaa si degdeg ah u jawaabtay, waxayna ku dadaalayaan inay [damiyaan dabka/nadiifiyaan ka dib markii dabka la damiyay].
Waxaan rajeyneynaa inaan dhowaan ku laabano dhismaha si aan dib ugu bilowno jadwalkeena joogtada ah.

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 61***)**

Qoyska [magaca dugsiga], waxaan dooneynay inaan ku ogeysiino inaan gelinay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' xarunteena sababo la xiriira dab yar oo ka dhacay [goobta].
Qof kastaa waa ammaan. [Magaca waaxda dabka] ayaa si degdeg ah u jawaabtay, waxayna ku dadaalayaan inay [damiyaan dabka/nadiifiyaan ka dib markii dabka la damiyay].
Waxaan rajeyneynaa inaan dhowaan ku laabano dhismaha si aan dib ugu bilowno jadwalkeena joogtada ah.

**Farta Farriinta Codka (***Tirada Erayada: 60***)**
Qoyska [magaca dugsiga], waxaad u heleysaa farriintan maxaa yeelay waxaan gelinay xaaladda 'Evacuate (Ka Bax)' Xarunteena sababtoo ah dab yar oo ka kacay [goobta].
Qof kastaa waa ammaan. [Magaca waaxda dabka] ayaa si degdeg ah u jawaabtay, waxayna ku dadaalayaan inay [damiyaan dabka/nadiifiyaan ka dib markii dabka la damiyay].
Waxaan rajeyneynaa inaan dhowaan ku laabano dhismaha si aan dib ugu bilowno jadwalkeena joogtada ah.

## Kadib Dhacdada

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 125*)

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Maanta, qiyaastii [waqtiga], waxaan galnay xaaladda ‘Evacuate (Ka Bax)’ kambaskeena sababtoo ah [warbixinno sheegaya qiiq/dab, xaalado kale sida la sharraxay].

Sababtoo ah tani waa wax aan ku tabobarano inta lagu jiro tijaaboyinka sida caadiga ah loo qorsheeyay, ardayda iyo shaqaaluhu waxay ahaayeen qaar xasilloon waxayna u nadiifiyeen dhismaha qaab nidaamsan. [Waaxda dabdamiskadamiska/booliska/ maamulka] ayaa baartay oo go'aamisay [sharrax xaaladda]. Dhammaanteen waxaan ku soo laabanay fasalka qiyaastii [waqtiga], maalinteenuna way sii socotay sidii caadiga ahayd.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka ‘Evacuate (Ka Bax)', fadlan booqo buugyaraha "I Love U Guys" Foundation. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga joogtada ah ee waxbarashada ardaydeena.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

# Gabbaad

## Xilliga Dhacdada

**Tambaleytka Qoraalka (***Tirada erayada: 32***)**

[Magaca dugsiga] ayaa hadda ku jira xaalad 'shelter (gabbaad)' sababo la xiriira xaaladaha cimilada daran ee aagga. Qof kastaa waa ammaan gudaha dhismaha, waana ku ogeysiin doonnaa marka xaaladda gabbaadka la qaado.

---

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 36***)**

Qoyska [magaca dugsiga] - ardaydeena iyo shaqaalaheena ayaa hadda ku jira xaalad 'shelter (gabbaad)' sababo la xiriira xaaladaha cimilada daran ee aagga. Waxaan ku jirnaa ammaan gudaha dhismaha waxaanan ku ogeysiin doonaa marka xaaladda gabbaadka la qaado.

---

**Farta Farriinta Codka (***Tirada Erayada: 36***)**

Qoyska [magaca dugsiga] - ardaydeena iyo shaqaalaheena ayaa hadda ku jira xaalad 'shelter (gabbaad)' sababo la xiriira xaaladaha cimilada daran ee aagga. Waxaan ku jirnaa ammaan gudaha dhismaha waxaanan ku ogeysiin doonaa marka xaaladda gabbaadka la qaado.

## Kadib Dhacdada

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 107***)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Horraantii maanta, waxaan gelinay xaaladda 'shelter (gabbaad)' xarunteena si aan u ilaalino ardaydeena iyo shaqaalaheena [sharrax xaaladda].

Sababtoo ah tani waa wax aan caadi ahaan ku dhaqanno, qof walba wuxuu ahaa mid ammaan ah, xasilloon oo ilaaliya nidaamka ilaa duufaantu gudubto.

Waan ognahay in tani ay waalidiinta u noqon karto xaalad cabsi leh, laakiin waxaan aad ugu dadaalnaa in aan hubinno in ardaydeena iyo shaqaalaheena ay ammaan yihiin.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan borotokoolka 'shelter (gabbaad)', fadlan booqo buugyaraha"I Love U Guys" Foundation.

Waxaan u mahadcelineynaa kalsoonidaada iyo iskaashigaaga waxbarashada ee ardaydeena.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 141***)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaa naga go'an inaan siino jawi waxbarasho oo ammaan ah iyo inaan kula socodsiino waxa ka dhacaya dugsigeena. Iyada oo taas la tixgelinayo, waxaan jeclaan lahaa inaan ku siiyo macluumaadka soo socda.

[Saaka/gallinkan dambe], ardayda iyo macallimiintu waxay ku soo warrameen urta [gaaska/walxaha kale] [fasal/marinka/maqaaxida/meel kale]. Isla markiiba waxaan la xiriirnay [kooxdayada dayactirka/ cidda kale ee ay khusayso] iyo [magaca shirkadda gaaska] si aan u baarno. Waxay [ku taliyeen inaan 'Evacuate (Baxno)'/ ku taliyeen inaan u rarno qaar ka mid ah fasallada meel kale] intay ku hawlanaayeen inay urta ogaadaan.

Ma jirin wax walaac ah oo xagga ammaanka ah, laakiin waxaan dooneynay inaan hubinno raaxada macallimiinteena iyo ardaydeena. Fasalladu waxay dib ugu noqdeen goobahooda caadiga ah qiyaastii [waqtiga].

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Mahadsanid,

[Magaca]
[mansabka]
[Magaca dugsiga]

# Xaalada Walxaha Khatarta ah (HAZMAT)

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 148***)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaa muhiim noo ah inaan kula socodsiino waxa ka dhacaya xarunteena iyo inaan siino jawi waxbarasho oo ammaan ah ardaydeena.

[Saaka/gallinkan dambe], waxaa naloo sheegay xaalad agab halis ah inuu yaal xarunta. [Faahfaahi halka iyo sida ay wax u dhaceen iyo waxa uu ahaa Walxaha Khatarta ah (HAZMAT), haddii ay suurtogal tahay].

Waxaan isla markiiba la xiriirnay kooxdayada [ilaalinta/dayactirka/kuwa kale] si aan wax uga qabano nadiifinta loo baahan yahay. Waxay [ku taliyeen inaanu galno 'Evacuate (Ka Bax)'/u wareejinno fasalada qaar meel kale] intay ku hawlanaayeen inay meesha ka saaraan [walxaha].

Ma jirin wax walaac ah oo xagga ammaanka ah, laakiin waxaan dooneynay inaan hubinno raaxada macallimiinteena iyo ardaydeena. Fasalladu waxay dib ugu noqdeen goobahooda caadiga ah qiyaastii [waqtiga].

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan habraacyada xaaladaha gurmadka ah ee [LEA], [guji ama ku lifaaq halkan]. Fadlan igala soo xiriirto [iimeylka] ama [lambarka taleefanka] haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Mansabka]
[Magaca dugsiga]

# Tagitaanka Korontada ama Internetka

## Dugsi Furan

**Tambaleytka Qoraalka (*Tirada erayada: 38*)**

Waxaan hadda la kulmaynaa tagitaan [Koronto/Taleefan/Internet] [Magaca dugsiga]. Wakiilada [Magaca shirkadda korontada/taleefanka/LEA/Waaxda Teknoolojiyadda Dugsiga] waxay ka shaqeynayaan soo celinta adeegga. Waan kula socodsiin doonnaa marka ay soo laabtaan adeegyadu.

**Tambaleytka Iimeylka (*Tirada erayada: 79*)**

Qoyska [Magaca Dugsiga] - waxaan hadda la kulmaynaa tagitaanka [korontada/taleefanka/internetka] dugsigeenna.

Wakiilada [magaca shirkadda korontada/taleefanka/LEA/Waaxda Teknoloojiyadda dugsiga] waxay ka shaqeynayaan sidii loo soo celin lahaa adeegga [korontada/taleefanka/internetka].

Waxaa naloo sheegay in ay qaadan karto ilaa [waqti] in dib loo soo celiyo. Dhanka kale, ardayda iyo shaqaalaha waxay [faahfaahinta waxa ay qabanayaan]. Waxaan ku soo diri doonnaa wixii soo kordha [iimeyl/farriin gaaban/boostada bulshada/websaytka xarunta] marka adeegga [korontada/taleefanka/internetka] dib loo soo celiyo.

**Farta Farriinta Codka (*Tirada Erayada: 80*)**

Qoyska [Magaca Dugsiga] - waxaan hadda la kulmaynaa tagitaanka [korontada/taleefanka/internetka] dugsigeenna.

Wakiilada [magaca shirkadda korontada/taleefanka/LEA/Waaxda Teknoolojiyadda dugsiga] waxay ka shaqeynayaan sidii loo soo celin lahaa adeegga [korontada/taleefanka/internetka].

Waxaa naloo sheegay in ay qaadan karto ilaa [waqti] in dib loo soo celiyo. Dhanka kale, ardayda iyo shaqaalaha waxay [faahfaahinta waxa ay qabanayaan]. Waxaan ku soo diri doonnaa wixii soo kordha [iimeyl/farriin gaaban/boostada bulshada/websaytka xarunta] marka adeegga [korontada/taleefanka/internetka] dib loo soo celiyo.

## Dugsigu Waa Xidhan Yahay

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 99***)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waxaad u heleysaa farriintan maxaa yeelay korontada ayaa ka tagtay [Magaca dugsiga] oo xarunta waa xiran yahay.

Waxaan la shaqeyneynaa [magaca shirkadda korontada] si aan u soo celinno korontada. Sababtoo ah wakiillada [shirkadda korontada] waxay aaminsan yihiin in [xaaladdan/dayactirka] ay socon doonto in ka badan dhowr saacadood, markaa waxaan go'aansanay inaan baajinno dugsiga maanta.

Waxaan dib kuula soo xiriiri doonnaa marka aan wax badan ka ogaano xaaladda waxaanan bixin doonnaa xog ku saabsan waxa laga filan karo berrito.

Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga inta aan wax ka qabanyno xaaladdan aan la fileynin.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Mansabka]
[Magaca Dugsiga]

# Jebitaanka Qasabad Wayn

**Tambaleytka Iimeylka (***Tirada erayada: 130***)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Sababtoo ah waxa jabtay qasabad wayn, waxaan [geli go'aanka] doonaa fasalada [magaca dugsiga] berrito.

Qiyaastii [geli waqtiga] maanta, waxaa ka dhacay [goobta] jabitaanka qasabad wayn. Shaqaalaha dayactirka [dugsiga/ degmada] [waxay ka jawaabeen isla markiiba/si degdeg ah inay xiraan biyaha], laakiin shaqada dayactirka waxay qaadan doontaa waqti.

Si loo hubiyo in ardaydeena si sax ah loo daryeelo oo shaqaaluhu ay awoodaan inay bixiyaan waxbarid tayo leh, go'aan ayaa lagu gaaray in [ku celi go'aanka]. Waa qorshahayaga in dugsigu dib u bilaabi doono hawlgallada caadiga ah [geli taariikhda/waqtiga dugsiga dib u bilaabmi doono].

Waxaan ka cudurdaaraneynaa wixii dhibaato ah ee soo gaari kara adiga iyo qoyskaaga. Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan igala soo xiriir [cinwaanka iimeylka] ama [lambarka taleefanka]. Waad ku mahadsan tahay taageeradaada.

Mahadsanid,

[Magaca]
[Shaqada]
[Magaca dugsiga]

**Tambaleytka Iimeylka (*Tirada erayada: 261*)**

[Taariikhda]

Qoysaska [Magaca Dugsiga] ee qaaliga ah,

Waa muhiim in qoysaskeena la ogeysiiyo waxa ka dhacaya xarunteena, taas anoo maskaxda ku haya, waxaan rabay inaan kuu sheego dhacdo aan baarnay [mudada waqtiga]. Ugu dambeyntii, ardaydeena ma aysan ku jirin khatar, laakiin waxaan si dhab ah u qaadanaa xaaladahan waxaanan rabnay inaan ku ogeysiinno.

[Arday/xubin shaqaalaha ah/waalidka] ayaa nooga digay khatar suuragal ah [Facebook/Instagram/Snapchat/Twitter/SafeUT] oo laga yaabo inay khatar ku tahay xarunteena. Isla markiiba, waxaan la xiriirnay [LEA/booliska maxalliga ah/Waaxda Teknoolojiyadda/kuwa kale] si aan u eegno.

Intii lagu guda jiray baaritaanka, waxaa la go'aamiyay in farriinta [aysan ku lug lahayn xarunteena/aysan ahayn khatar wax ku ool ah/aysan ahayn walaac ammaan]. Booliska [ayaa aqoonsaday ardayga oo anshaxmarin ayaa la go'aamin doonaa iyadoo lagu saleynayo Xeerka Habdhaqanka Ardayga]. Sharciyada asturnaanta dartood, ma wadaagi karno faahfaahin dheeraad ah.

Waxaan jeclaan lahaa inaan ku dhiirrigeliyo qoysaskeena inay ka wada hadlaan cawaaqibka daran ee ka dhalan kara ardayda ku abuuraya ama wadaagaya farriimaha khatarta sheegaya warbaahinta bulshada. Borotokoolada degmadeena ayaa nooga baahan yihiin inaan u sheegno booliska markasta oo ay taasi dhacdo. Xitaa haddii fariintu ay u muuqato mid xaraabaysi ah, waxaa jira suurtagalnimada in ardaygu la kulmi karo dacwado dambiyeed marka lagu daro edbinta degmada.

